

Midab takoor ku waa mid lid ku ah sharciga

Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka ee Gobolka Washington waxay u hoggaansamaan sharciyada xuquuqaha rayidka federaalka ee la dabakhi karo mana ku samaynayaan dadka midab takoor ku salaysan isirkooda, midabka, asalka dhallashada, da'da, naafada, ama jinsiyada. Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) dadka ugama reebaan ama si kala duwan ulama dhaqmaan ayada oo sabab u ah isirkooda, midabkooda, asalkooda dhallashada, da'dooda, naafonimadooda, ama jinsigooda.

Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka sidoo kale waxay u hoggaansamaan sharciyada gobolka la dabakhi karo mana ku sameeyaan dadka midab takoor ku salaysan caqiido, nooc, muujin nooca qofka ama shakhsiyadiisa ah, jihatn galmu, xaalada guur, diin, looga saaray si sharaf leh xaalada ciidan ama halyeeynimo hore, ama isticmaalida hagid eey tababaran ama adeeg xayawaan la siiyo qof naafo qaba.

Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka:

- Waxay siiyaan dadka qaba naafada adeego iyo gar-gaaro si ay noogula xiriiraan si wanaagsan, sida:
 - o Turjubaano luuqada indhoolayaasha ah oo aqoon u leh
 - o Macluumaad qoran oo qaabab kale ah (far waaweyn, dhagaysi, qaabab qoraalo eliktaronig ah oo la heli karo, iyo qaabab kale)
- Waxay siiyaan adeego luuqad bilaash ah dadka aan luuqadooda aasaasiga ahi ahayn Ingiriisi, sida:
 - o Turjubaano aqoon u leh
 - o Macluumaad ku qoran luuqado kale

Haddii aad u baahantahay adeegahaan, la xiriir lambarkan 1-877-501-2233.

Haddii aad aaminsantahay in Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka ay ku guuldareysteen in ay bixiyaan adeegahaan ama si kale ay kuu takooreen, waxaad u soo diri kartaa/ka xareyn kartaa cabasho:

Department of Social and Health Services

ATTN: Constituent Services
PO Box 45131
Olympia, WA 98504-5131
1-800-737-0617
Faakis: 1-888-338-7410
askdshs@dshs.wa.gov

Health Care Authority Division of Legal Services

ATTN: Compliance Officer (ADA/Nondiscrimination Coordinator)
PO Box 42704
Olympia, WA 98504-2704
1-855-682-0787
Faakis: 1-360-507-9234
compliance@hca.wa.gov

Waxaad u samayn kartaa faylka cabashada qaab shakhsiyeed ama qaab boosto, faakis, ama iimayl. Haddii aad u baahantahay in laguugu caawiyo samaynta faylka cabashada, Qaybta Adeegaha Sharciiyeed ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka iyo Adeegaha Dastuurka ee Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ayaa diyaar u ah in ay adiga ku caawiyaan.

Sidoo kale waxaad faylka cabashada xuquuqaha rayidka u diri kartaa Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bani'aadamka Maraykanka, Xafiiska Xuquuqaha Rayidka qaab ilaktaronig ah halkan <https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf>, ama boosto ama teleefoon halkan:

U.S. Department of Health and Human Services
200 Independence Avenue SW
Room 509F, HHH Building
Washington, D.C. 20201
1-800-368-1019, 800-537-7697 (TDD).

Foomamka cabasho waxaa laga heli karaa cinwaankan www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html.